

Maalgashiga ugu badnaa ee daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ee Alberta

Febraayo 21, 2023

Dawladda Alberta waxay soo jeedinaysaa maalgalin taariikhi ah si loo xoojiyo hannaanka daryeelka caafimaadka ee aasaasiga ah.

Haddii la meelmariyo, Miisaaniyadda 2023 waxay maalgalin aad u badan oo \$2 bilyan ah– tii abid ugu badnayd ah – ku bixinaysaa sidii loo hagaajin lahaa daryeelka caafimaadka ee aasaasiga ah. Arrintaan waxaa kamid ah maalgalinta Shabakadaha bixiya Daryeelka Aasaasiga ah, lacag la siinayo dhakhaatiirta qoyska, maalgalinta si loo xoojiyo loona casriyeeyo daryeelka caafimaadka aasaasiga ah, maalgalino si loo caawiyo dhakhaatiirta bulshada nidaamyada teknoolojiyadda ee ka caawinaya sii wadista daryeelka bukaanada la siiyo.

Guddoomiyaha gobolka Smith iyo Wasiir Jason Copping waxay ahmiyadda siinayaan muhiimadda ay leedahay taageerada daryeelka aasaasiga ah maadaama uu yahay aasaaska hannaankeenna daryeelka caafimaadka.” Arrintan waxaa kamid ah taageerista sii wadidda shaqada Casriyaynta Hannaanka Daryeelka Aasaasiga ah ee Alberta (MAPS).

Golaha Talo bixinta Dadka Asalka ah iyo Istiraatiijiyadda MAPS wuxuu soo bandhigay warbixinno kumeelgaar ah oo ay siiyeen wasiirka, kaasoo mabda’ ahaan aqbalay dhammaan soojeedinahooda. Miisaaniyadda 2023 waxay maalgalin gaar ah ku bixin doontaa sidii loo meelmarin lahaa fursadahaas xilliga hore ah si loo maalgaliyo daryeelka aasaasiga ah.

Alberta waxay leedahay shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee ugu fiican adduunka. Dawladda Alberta waxaa ka go’an inay xaqiijiso in dadka reer Alberta ay helaan daryeelka ay u baahan yihiin goorta ay ubaahan yihiin. Arrintan waxaa kamid ah dadyowga First Nations, Métis, iyo Inuit si ay u helaan ka faa’idaysi loo simanyahay oo ah adeegyada daryeelka caafimaadka ee ammaanka ah kuna habboon, ayada oo aan loo eegayn halka ay Alberta kaga nool yihiin.

Macluumaadka la xiriira

Casriyaynta Hannaanka Daryeelka
Caafimaadka Aasaasiga ah ee
Alberta

Maalgalintan lasoo jeediyay oo ah tii abid ugu badnayd waxaa qayb ka ah \$211 milyan oo ah maalgalin cusub oo lagu xoojinayo hannaanka daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ee gobolka oo dhan. Haddii la meelmariyo, Miisaaniyadda 2023 waxay \$125 milyan ku bixin doontaa meelmarinta talooyinka ay soo jeediyeen MAPS, \$74 milyan oo ah maalgalinta cusub ee PCN, iyo \$12 milyan oo lagu taageerayo hannaanka teknoolojiyadda ee loogu tala galay horumarinta sii wadidda daryeelka gobolka oo dhan.

Maalgalinta cusub ee MAPS waxay gacan ka gaysan doontaa meelmarinta talo soojeedinada ka iimaanaya Golaha Talobixinta Istiraatiijiyadeed ee MAPS iyo dadka Asalka ah, waxaa kujira howlo istiraatiijiyadeed oo is xigxiga oo leh natiijooyin la taaban karo. Talaabooyinkanu waxay bilaabi doonaan wax ka qabashada caqabadihii muddada dheer soo jiray ee ay wajahayeen dadka reer Alberta, oo ay ka mid yihiin dadyowga Asalka ah marka ay raadsanayaan daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ee Alberta.

Wasiir Copping wuxuu rajaynyaa in goluhu soo bandhigi doono warbixinohooda dhammayska tiran Gu'ga 2023. Isla wakhtigaas, talo soojeedinada tilmaamaya fursadaha maalgashiga xilliga hore ah waxaa lasoo galin doonaa websaytka MAPS.

Warbixinaha ugu danbeeya ee ka imaanaya golaha MAPS ayaa noqon doona hannaanka shaqada ee bixinta daryeelka aasaasiga ah ee mustaqbalka Alberta. Ayada oo si cusub diiradda loo saarayo daryeelka aasaasiga ah ee Alberta, hannaanka guud ee caafimaadka gobolku wuxuu noqon doonaa mid aan aad ugu tiirsanayn daryeelka xaaladaha degdega ah iyo isbitaal dhigista wuxuuna daryeelka ay u baahan yihiin siin doonaa dadka reer Alberta ee u baahan goob kasta iyo meel kasta oo ay joogaan. Arrintani diiradda lagu saarayo daryeelka aasaasiga ah waxay sidoo kale keeni doontaa natiijooyin caafimaad oo u wanaagsan dadka reer Alberta.

Xaqiiqooyinka kooban

- Daryeelka caafimaadka ee aasaasiga ah waa goobta ugu horraysa ee dadka reer Alberta ka raadsadaan hannaanka caafimaadka, waxaana kamid ah xirfadleyaasha caafimaadka sida dhakhaatiirta qoyska, dhakhaatiirta kalkaalisoooyinka ah (nurse practitioners), farmashiileyaasha iyo kalkaalisoooyinka caafimaadka bulshada.
- Saddex gole oo talo bixin ah ayaa la sameeyay ayada oo la adeegsanayo MAPS xagaagii 2022 si loo ogaado horumarada daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ee muddada gaaban iyo 10ka sanno ee soo socota.
- Ayaga oo si dhow ula shaqaynaya Ururka Caafimaadka Alberta, PCN-yada iyo hoggaamiyeyaasha kale ee ka shaqeeya daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ee gobolka oo dhan, goleyaashu waxay wax ka qabanayaan arrimo waaweyn, ayaga oo aqoonsanaya meelaha muhiimka ah ee loo baahan yahay in la horumariyo soona jeedinaya talooyin ku saabsan labadaba fursadaha cusub iyo qaababkii loo dardargalin lahaa meelaha nidaamku ka fiican yahay.
- Warbixinta ugu danbaysa ee ku saabsan istiraatiijiyadda lagu talinayo ee casriyaynta hannaanka daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ee Alberta waxaa lasoo gabagabayn doonaa gu'ga 2023.